



Kooxda IDG ee DMCC

1405 JBC 5, Cluster W, Jumeriah Lakes towers, PO Box 50784, Dubai.

# SIYAASADDA KA HORTAGGA ADDOONSIGA IYO KA GANACSIGA BANIAADAMKA

Janaayo 2020

NOOCA 1.1





## KOONTAROOKKA NOOCA

NOOCA	LASOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	DISEEMBAR 19	G WINTER	I GORDON
1.1	Janaayo 20	G WINTER	



## TUSMO

TUSMO.....	1
SIYAASADDA KA HORTAGGA ADDOONSIGA IYO KA GANACSIGA BANIAADAMKA .....	2
1. Baaxadda .....	2
2. Bayaanka Siyaasadda.....	2
3. Mas'uuliyadda loogu tala galay Siyaasadda .....	2
4. Waafaqidda Siyaasadda .....	3
5. Xiriirka iyo Wacyigalinta ku saabsan Siyaasaddaan.....	4
6. Xadgudubyo ka dhan ah Siyaasaddaan .....	4



## SIYAASADDA KA HORTAGGA ADDOONSIGA IYO KA GANACSIGA BANIAADAMKA

### 1. Baaxadda

IDG siyaasaddeeda ka hortagga addoonsiga iyo ka ganacsiga baniaadamka waxay nagu caawisaa inaan waafaqno Qodobka Kahortagga Addoonsiga Casriga ah ee UK ee 2015. Waxay ku taxaluqdaa shaqaalaha, qandaraasleyaasha iyo dadka kale ee aanu shaqo wadaagta nahay, waxayna siisaa talo loogu tala galay ka hortagga addoonsiga iyo ka ganacsiga baniaadamka iyo tillaabooyinka looga hortago addoonsiga iyo ka ganacsiga baniaadamka ee dhanka shaqada iyo qaababkeena qeybinta badeecooyinka [min warshad illaa qofka isticmaalaya].

### 2. Bayaanka Siyaasadda

Addoonsiga casriga ah waa dambi iyo xadgudub ka dhan ah xaquuqul insaanka aasaasiga ah. Waxaa uu leeyahay dhowr qaab, sida addoonsi, booyaasonimo addoonsi ah, shaqo qasab ah iyo ka ganacsiga baniaadamka, kuwaasi oo kulligood ka xayuubiya qofka xoorriyadiisa ayadoo qof kale uu ka xayuubinayo si uu ugu takri falo si uu u helo manfac shakhsi ahaaneed ama mid ganacsi. Waxaa naga go'an inaan u dhaqano si anshax ah oo daacadnimo leh dhammaan macaamilkeena ganacsiga iyo xiriiradeena iyo xoojinta nidaamyo wax ku ool ah iyo koontaroolada si loo xaqiijiyo in addoonsiga casriga ah uusan ka dhicin meel un ka mid ah ganacsigeena iyo wax ka mid ah silsiladaheenna qeybinta.

Waxaa naga go'an sidoo kale inaan xaqiijino in ay jirto daah furnaan ah gudaha shaqadeena iyo qaabkeena aan uga hortageyno addoonsiga casriga ah silsiladeena wax qeybinta oo dhan, taasoo waafaqsan waajibaadkeena wax dabool ka qaadidda ah oo hoos imaanaya Qodobka Kahortagga Addoonsiga Casriga ah ee UK ee 2015. Waxaan si isku mid ah uga fileynaa heerarka sare dhammaan qandaraasleyaasha noo shaqeeya, kuwa qeybiya alaabada iyo dadka nala shaqeeya ee kale, oo si qeyb ka ah hannaankeena qandaraas bixinta, waxaan ku soo dareynaa mamnuucyo gaar ah oo ka dhan ah shaqo la qasbay ama qofka laga ganacsanyo, ama in qof un lagu qasbo in la addoonsado ama looga dhigto booyaas si qasab ah, haddii uu yahay qof weyn ama carruur, waxaana fileynaa in dhammaan dadka alaabada qeybiya ee nala shaqeeya ay iyana ay ku qasbaan heerarkan sare qudhooda dadka usii shaqeeya ee alaabada qeybiya.

Siyaasaddaan waxay ku taxaluqdaa dhammaan shakhsiyaadka inoo shaqeeya ama magaceena ku shaqeeya awood kasta oo ay leeyihiin, oo ay ku jiraan shaqaalaha heer walba leh, agaasimeyaasha, saraakiisha, shaqaale wakaaladeed, shaqaalaha heerka labaad, dadka iskaa wax u qabsada ku shaqeeya, dadka si ay khibrad u helaan u shaqeeya, wakiillada, qandaraasleyaasha, la taliyeyaasha ka imaanaya dibadda shirkadda, wakiiladda daraf saddexaad ka socda iyo dadka la hawlaga ee ganacsiga laga wada shaqeeyo.

Siyaasaddaan ma noqoto qeyb ka tirsan qandaraaska qofi leeyahay ee shaqada waxaana laga yaabaa inaan wax ka baddalno waqtigii aan doono.

### 3. Mas'uuliyadda loogu tala galay Siyaasadda





Guddiga agaasimeyaashu wuxuu leeyahay mas'uuliyad guud oo loogu tala galay xaqiijinta in siyaasaddaani ay waafaqdo wajibaadkeena sharciga iyo anshaxa, iyo in dhammaan dadka soo hoos galaya kormeerkeena ay waafaqaan.

Madaxa Fulinta ee ugu Sarreeya wuxuu leeyahay mas'uuliyadda aasaasiga ah ee maalinlaha ah ee loogu tala galay hirgalinta siyaasaddaan, asagoo kormeeraya isticmaalkeeda iyo waxtarkeeda, asagoo la tacaamulaya wixii su'aalo ah oo iyada ku saabsan, isla markaana xisaabinaya nidaamyada koontaroolka ee gudaha iyo habraacyada lagu xaqiijinayo inay yihiin wax ku ool ee dhanka ka hortagga addoonsiga casriga ah.

Maareynta heer kasta leh waxay mas'uul ka tahay xaqiijinta in dadka u imaanaya ay fahmayaan oo waafaqayaan siyaasaddaan lana siiyo tababar kufilan oo joogto ah oo iyada iyo silsiladaha qeybinta ee addoonsiga casriga ah ku saabsan.

Waxaa lagugu casuumay inaad faallo ka bixiso siyaasaddaan aadna sheegto siyaabaha lagu horumarin karo. Faallooyinka, waxyaabaha lasoo jeedinayo iyo su'aalaha waa la dhiirigalinayaa waana in loo soo gudbiyo madaxa shirkadda, CEO.

#### 4. Waafaqidida Siyaasadda

Waa inaad xaqiijiso inaad aqrido, aad fahamto aadna waafaqdo siyaasaddaan.

Ka hortagga, dareemidda iyo soo tebinta addoonsiga casriga ah qeyb kastoo shaqadeena ah ama silsiladaheena wax qeybinta waa mas'uuliyadda dhammaan dadka inoo shaqeeya ama koontaroolkeena ku hoos shaqeeya. Waxaa lagaa doonayaa inaad ka fogaato wixii hawl ah ee horseedi karta ama go'aamin karta xadgudub ka dhan ah siyaasaddaan.

Waa inaad maareeyahaaga kusoo wargaliso durba haddii aad rumeysato ama ka shakido in la khilaafay siyaasaddaan, ama in la khilaafi doono mustaqbalka.

Waxaa lagugu boorinayaa inaad sheegto wixii walaac ah oo ku saabsan arrin un ama shaki laga qabo addoonsiga casriga ah kaasi oo ka dhacaya meel un ka tirsan ganacsigeena ama silsiladaheena wax qeybinta ee heerarka kala duwan ee qeybinta markii uu marayo marxaladda ugu horreysa ee macquulka ah.

Haddii aad aaminsan tahay in uu dhacay xadgudub ka dhan ah siyaasaddaan ama laga yaabo inuu dhici doono waa qasab inaad soo ogeysiiso maareeyahaaga ama aad usoo tebisno si waafaqsan Siyaasadda Sheegidda Wixii Dhib ah durba sida ugu dhaqso badan. Waa inaad ogaato markii ay habboon tahay arintaas oo maadaama aan mudnaan siino badbaadada iyo daryeelka shaqaalaha maxalliga ah, waxaan bixin karnaa taageero iyo talo loogu tala galay dadka wax qeybiya ee noo shaqeeya si loogu caawiyo inay wax ka qabtaan shaqada qasabka ah ama ku takrifalidda dadk ah iyo habdhaqankeeda gudaha shaqadooda iyo silsiladahooda wax qeybinta.





Haddii aadan hubin in ficil gaar ah, la tacaamulka shaqaalaha si guud ahaaneed, ama xaaladahooda shaqada gudaha qeyb un ka tirsan silsiladaheena wax qeybinta ay u dhigmaan wax un ka mid ah qaababka kala duwan ee addoonsiga casriga ah, ku wargali arrinka maareeyahaaga.

Waxaan diiradda saareynaa inaan dhiirgalino furfurnaan waxaana taageeri doonaa qof kastoo soo sheega walaacyo dhab ah si niyad sami ah oo waafaqsan siyaasaddaan, xataa haddii ay hadhoow noqdaan khalad. Waxaa naga go'an inaan xaqiijino inuusan qofna la dhibaatoon la tacaamul waxyeello leh oo loo geysto kadib markii uu u soo tebiyo si niyad sami ah shaki uu ka qabo in addoonsi casri ah qaabkii uu ahaadaba gudaha qeyb un ka tirsan ganacsigeena ama silsiladaheena wax qeybinta uu kajiro ama laga yaabo inuu kajiro. Tacaamul waxyeello leh waxaa kujira shaqo ka saarid, tillaabo edbin ah, hanjabaado ama macaamil kale oo aan fiicneyn oo la xiriira sheegidda walaac jira. Haddii aad aaminsan tahay inaad la dhibtootay tacaamul caynkaas ah oo lagugula kacay, waa inaad durba u sheegto maareeyaha u hoggaansamidda. Haddii aan arrinka wax laga qaban, aadna shaqaale tahay, waa inaad usoo tebiso si rasmiyah adoo isticmaalaya Habraaca Cabashada.

## 5. Xiriirka iyo Wacyigalinta ku saabsan Siyaasaddaan

Ku tababarashada siyaasaddaan, iyo halista ganacsigeenu wajahayo taasi oo ka imaanaysa addoonsiga casriga ah iyo silsiladihiisa wax qeybinta, waxay qeyb ka noqotaa hannaanka soo galitaanka ee loogu tala galay dhammaan shakhsiyaadka inoo shaqeeya, oo tababar joogto ah ayaa la bixin doonaa haddii loo baahdo.

Ballanqaadkeena aanu wax uga qabanayno addoonsiga casriga ah ee gudaha shaqadeena iyo silsiladaha qeybinta ah waa in loo sheego dhammaan dadka wax qeybiya, qandaraasleyaasha iyo dadka aanu wada shaqeyno ee shaqadu naga dhexeyso bilowga xiriirkeena ganacsiga ee aan iyaga la leenahay intaa kadibna waa in loo xoojiyo hadba sidii munaasab ah.

## 6. Xadgudubyo ka dhan ah Siyaasaddaan

Qofkii shaqaale ah ee ku kaca xadgudub ka dhan ah siyaasaddaan waxaa laga qaadi doonaa tillaabo edbin ah, taasi oo keeni karta in shaqada looga eryo anshax xumo ama anshax xumo weyn.

Waxaa laga yaabaa inaan joojino xiriirka aanu la leenahay shakhsiyaad kale iyo ururro ku shaqeeya magaceena haddii ay ku kacaan xadgudub ka dhan ah siyaasaddaan.

